Fursadaha Lahaashaha Guryaha ee Minneapolis

Gargaarka Lacagta Deebaajiga Ah
Shuruudaha Barnaamijka

1. **Barnaamijka oo la soo Gaabiyey:**
   Homeownership Opportunity Minneapolis (HOM) waxa ay idiin fidineysaa gargaarka aad guri kaga iibsataan Minneapolis.

2. **Deyn Qaatayaasha Ka Soo Baxa Shuruudaha:**
   - Deyn qaatuhu waa inuu la yimaadaa heshiis kala iibsasho xilliga uu buuxinayo codsiga.
   - Khasab ma aha inuu yahay guriga ugu horeeya ee uu iibsado deyn qaatuhu.
   - Deynt qaatuhu waxa uu la iman karaa lambarka canshuur bixiyo ee u gaarka ah (ITIN) ama lambarka bulshada.
   - Dakhliga deyn qaataha waa inuusan ka sareyn 80% heerka dakhliga ee degaanka (AMI). Dakhliga soo gala dadka hoos ku xusan waa in la xaqiijiyaa oo xisaabta lagu daraa marka la xisaabayo Dakhliga Guud ee Sanadlaha Ah:
     - Qof kasta oo hantida wax ku yeelanaya ama saxiixaya Qoraalka Deynta.
     - Qof kasta oo la filayo inuu deganaado guriga oo waajib ay ku noqoneyso inuu wax ka bixiyo deynta (saxiixa balan qaadka) laakiin aanu magaciisa mulkiyadda guriga ku qorneyn; sida qofka damaanad qaada oo wax ka saxiixa heshiiska (magaciisana uu ku qorneyn mulkiyadda guriga iyo warqadaha Deynta).
     - Xaaska ama seyga sharci ahaan isu qaba oo wax ka deganaanaya guriga laga hadlayo.
   - Deyn qaatayaasha doonaya in ay deyn ka helaan FHA kaa soo ah deynta aasaasiga ah ee guriga, dakhliga waxaa ka mid noqonaya dakhliga soo gala dhamaan xubnaha qoyskla, haddii magacooda lagu qoro mulkiyadda iyo haddii aan lagu qorinba ama ay waajib ku tahay inuu bixiyo deynta HOM.
   - Dhamaan kuwa ku iibsanaya waxaa go'aan ka gaaraya Maamulaha Barnaamijka iyada Magaaladu ay ogolaaneyso.

3. **Guryaha ka soo baxa Shuruudaha**
   - Guri iskii u taagan (oo ay ka mid yihiin kuwa dhinaca isku haya ama isku dhaggan) ama is dul saaran oo ku yaal gudaha Minneapolis.
   - Majiro qiime iib ah oo u xadidan.
   - Qofka iibsanaya waa inuu guriga u soo guuraa 60 maalmod gudahood ka dib marka uu guriga iibsado.

4. **Qodobada Deynta:**
   - Dulaar ma laha
   - Majirto lacag bil kasta la bixinayo.
   - Deynta waa in 100% la bixiyaa dhamaadka deynta koowaad AMA lagu sameeyaa maalgelin AMA marka uu mulkiiluhu ka geeriyoodo guriga uu deganaa AMA wareejiyo AMA dhamaadka 30ka sano ee mudada deynta.
   - Deynta waxaa laga yaabaa in ay qeyb ka noqon karto dib u maal gelinta deynta aasaasiga ah. Deynta noocan ah waxaa loo tixgeliyaa "Deynt Gaar Ah" sida uu dhigayo Sharciga Minnesota ee 58.13.

5. **Deynta:**
   - Deynta ugu badan ee loo ogol yahay codsadaha dakhligiisu yahay 60% ee AMI ama ka hooseeya waa $20,000.
     - Gargaargan waxaa bixinaya American Rescue Funding
   - Deynta ugu badan ee loo ogol yahay codsadaha dakhligiisu yahay 60% ilaa 80% ee AMI waa $10,000.

6. **Isticmaalka Lacagta**
   - In lagu bixiyo lacagta deebaajiga ah.
   - In lagu bixiyo lacagta gadashada iyo diiwaan gelinta guriga .
   - Qeyb kasta oo ka mid ah deynta oo aan loo adeegsan lacagta deebaajiga ah ama lacagta diiwaan gelinta ee ay waajibka tahay in dib loo siiyo Magaalada Minneapolis iyo taasoo yareyneysa deynta soo harta. Deynta looma adeegsan karo in deyn qaatuhu ku bixiyo iibsashada ama fal kala iibasasho oo horay u dhacay.

7. **Waxbarashada La Talinta Maaliyadda Ee Laga Doonayo Iibsadaha Guriga:**
   - Iibsadaha guriga waa inuu qaataa fasal qof ahaan lagula talinayo arrimaha maaliyadda ee hay'adaha loo xil saaray inay bixiyaan fasaladaas. Iibsadaha guriga waa inuu qaataa shahaadada cadeyneysa inuu dhameystiray fasalka taasoo taariikhda shahaadada ay ka horeyso maalinta heshiiska la saxiixay ugu yaraan sadex bilood (3) ka hor. Shahaadada la qaatay wax ka badan muddo sanad ah lama ogola.
   - Iibsadaha guriga waa inuu fasalka waxbarashada ee maaliyadda la xiriirta waa inuu ka qaataa HomeStretch™ (oo ay marti gelinayaan Xarunta Iibsashada Guryaha ee Minnesota, 651-659-9336 ama www.hocmn.org), Framework® (Waxbarashada dadka iibsanaya guryaha ee barta internetka ee www.hocmn.org), ama Minneapolis Urban League American Dream Program. Dhameystirka fasalada guri iibsadaha waxa ay dheeraad ku yihiin la talinta maaliyadda ee qofka u gaarka ah waana waajib in la dhameystiro oo shahaadada aad qaadato ka hor inta aadan saxiixin heshiiska iibka ama aadan HOM ka codsan gargaarka debaajiga ah.

8. **Shuruudaha Deynta Aasaasiga**
   - Waxaa laga yaabaa in deynta la idinku siiyo heer joogta ah ee FHA,VA, Fannie Mae, ama Freddie Mae, leh ceymis, aan laheyn ceymis, ama deyn aan dulsaar laheyn oo inta badan loo yaqaan "A" ama deyn "aasaas ah".
   - Waxa kale oo suurogal ah in aad deynta ku lamaanisaan isku dhafka heshiis mulkiyadda ama midda ay bixiyaan hay'ado aan faa'iido doon aheyn iyada oo hay'adda aan faa'iido doonka aheyn ay sii iibin karin heshiiska maaliyadda iyada oo aan ogolaasho qoraal ah ka helin Magaalada. Barnaamijka heshiiska mulkiyadda waa in ay Magaaladu ogolaataa ka hor ka qeyb qaadashada barnaamijka Degaanka.
   - Deynta laga qaadan karo hay'ad mid kale hoostimaadda.
   - Waxaa suurogal ah in Maalgelinta laga helo barnaamijka Degaanka lagu lamaanin karo gargaarka barnaamijyada si ay u kordhiyaan fursadda deyn qaataha ku xaqiijin karo inuu iibsan karo guriga.
   - Barnaamijkan aasaas loogama dhigi karo Barnaamijyada kale ee Magaalada Minneapolis ee barnaamijka gargaarka ee iibsadaha guriga.

9. **Damaanad Qaadka Deynta**
   - Deynta HOM waa mid ka baxsan damaanad qaadka Qoraalka Deynta iyo Deynta IIbsashada.
   - Deynta waxaa damaanad qaad u noqon kara rahmadda ee barnaamijyada kale ee maalgelinta.
   - Lagaama doonayo ceymiska mulkiyadda (lahaanshaha) hantida.
   - Lagaama doonayo qodob ka mid ah deynta iibsashada oo waajib ka dhigeysa in mulkiiluhu iibsado ceymiska waxyaabaha kiimikada la xiriira ah.

10. **Luqadda Masiibooyinka**
   - Haddii ay dhacdo in hay'adda bixisay deynta ama kuwa ka shaqeeyey, ama cid ay u xil saareen, ka dib marka la sameeyo daraasadda lagu yareynayo, ee masiibada ka dib, oo ay ka mid tahay laakiin aan ku koobneyn dhimasho ama xanuun raaga, ama xanuun raaga oo ku dhaca qof qoyska ka tirsan oo la nool deyn qaataha si uu u taageero, taasoo oo si ku meel ah ama joogta ah caqabad ugu noqoto awoodda uu deyn qaatuhu u leeyahay inuu bixiyo sida uu dhigayo Qoraalka Deynta iyo Deynta Iibsashada taasoo waajib ka dhigeysa in Hantida lagu iibiyo qiime ka hooseeya kan ka haray Qoraalka Deynta ama Deynta Iibsashada, taasoo qeybta Qoraalka Deynta ama Deynta Iibsashada ee loo heysto hantida aysan ku filneyn in ay ku filnaato qiimaaha hantida lagu iibiyo.

11. **Sidee loo codsadaa**
   - Si aad u ogaato shuruudaha ku xiran iyo dhaqaalaha ay heli karaan dadka soo codsanaya waxa ay la soo xiriiri karaan

BuildWealth MN
2121 Plymouth Ave N
Minneapolis, MN 55411
612-877-4182 xafiiska
612- -436-5418 faakis
info@buildwealthmn.org

NeighborWorks Home Partners
1930 Glenwood Ave
Minneapolis, MN 55405
651-292-8710 xafiiska
651- -292-0473 faakis
hello@nwhomepartners.org